# Golaha Wakiiladda

## WAAXDA SHURUUCDA, HADAL-QORAALKA IYO FADHIYADA

**Kal-fadhigii 43aad fadhigii 25aad**

***Salaasa, 22 September 2020***

**Quraanka: -** Md. Xaamud Cismaan

**Gudoonka: -** Gudoomiye Axmedyaasiin Sh. Cali

**Ajandaha Fadhiga:-**

- *Doodda Xeerka Aaga ganacisga ee ka caagan cashuuraha (free zone bill)*

**Gudoonka:-** Mudnayaal maanta waxaynu galaynaa Doodaa Xeerka Aaga Ganacsiga ee ka caagan Cashuuraha, waxaana doodda Xeerka ku soo dhoweynayaa Xildhibaana Xaamud Cismaan.

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal** **(6min 08sec):-** Gudoomiye, Xildhibaanada, Kaaliyayaasha, Saaxaafadda intaba waad salaaman tihiin ASC, Gudoomiye, waxaan marka hore ka mahadnaqayaa Xeerkan inuu English ku qoran yahay Af-somalina lagu turjumay, laga yaabaa in meelaha qaarkood turjumaadu is khilaafto meelaha qaarkood, laakiin in international law hadii wax khaldamaan kan loo noqonayaa waxay ila tahay inuu yahay kan English-ka ah, marka taas waan mahadcelinayaa in caynkaas lagu soo gudbiyay.

Magaalada Barbera oo inta badan Xeerkani khuseeyo waa magaalo igu qaaliya oo ah halkaan siyaasada ka bilaabay anigoo yar, waxa jirtay markaan yara waxaan active isticmaarkana waan diidanaa oo laba jeer baa la xidhay, mar anigoo 15 jir ah oo da'daa isii daysay, mar kalena 18 jir baan ahaan iyana da'daa isii daysay oo marka waxa lagu qaangaadhi jiray 21 jir sharcigii ingriiska u yaalay marka da'daa ila baxsatay. Magaaladaasi horta caynkaas ayay aniga qaali iigu tahay.

Waxaan kale oo aan doonayaa inaan Golaha xasuusiyo markii aynu DP World ka hadlanay waxa loo arkayay inaanu DP World diidanahay, laakiin maanu diidanayn horumar ee waxa jiray waxyaabo aan dhamaystirnayn oo aan ka warwarnay kuna jirin contingency-gii la inoo keenay, maanta la mahdinayaa oo waxa la leeyahay Magaaladii iyo Dekadii way dhismaysaa, waxaana isleeyhay mucaaradii ka dhalatay markaa ee shacab waynaha ayay waxaas oo dhami ku hagaageen, waana mahadalle.

Xeerkani waa xeer aad u muhiim u ah wuxuu u baahan yahay qof sharci yaqaana oo ku takhasusay free zone-ka arrimihiisa, anigu ra'yiga aan ka haysto waxaan haysta Master

Marketting-ka ah wuuna taabta oo free zone-ka Marketing-ku qayb wayn buu ka yahay, waxa kale oo aan haysta diploma specialist ah sida wax loo maalgaliyo, hana anigu arrintaas free zone-ka expert kuma ahi. Gudoomiye waxa loo baahan yahay expert advice khibradiisa ku takhasusay free zone-ka, waxyaabaha aan ka xasuusto waxa ka mid ah waxaynu dhowaan cilaaqaad is dhaafsanay dalka Taiwan la yidhaahdo, waa dal baayac-mushtarka horumar aad ka gaadhay, marka waxaan rumaysnahay in aynu iyaga ka dalbano laba miduun oo ah inay niman expert ah oo inagala taliya inagu caawiyaan ama sida DP World dekada loogu wareejiyay aynu iyaga ku wareejino free zone-ka oo nidhaahno idinku noo maamula muddo shan sanadood oo kale ah ka dibna la wareegno markaynu khibrad ka helno inagoon mudadda isku dheerayn taas waan soo jeedinayaa.

Waxa kale oo aan dhaliilayaa Xeerkan Xukuumadii tan ka horeysay ee Madaxweyne Siilaanyo way hayeen Xeerkan may keenin, Madaxweynaha iminka joogana saddex sanadood baa u dhamaanayo isna muu keenin, iminka aad baan ula yaabanahay mudo yar oo Goluhu galayo fasax galayo ii ansixiya oo ii soo dhameeya, waxaana degreetada uu Madaxweynuhu ku soo gudbiyay ku qornayd wadanka u baahan, wadanku wuu u baahan yahay laakiin waxay somalidu tidhaahdaa waan baahanahay bahalo looma cuno, hadii kani inagu xumaado hadhaw waynu si qoomameynaynaa.

***Waxaan ku soo gabo-gabeynayaa:-***

- Ha laga fiirsado, dib ha loo dhigo oo Expert aan dalbano Madaxweynahana sidaas aan ku wargalino, WSC.

**Md. C/raxman Maxamed Jaamac (Xoog)** **(12min 26sec):-** ASC, Gudoomiye iyo Xildhibaanada sharafta leh marka hore waan idin salaamayaa, anigoo waajibaadkayga dastuurka ee la isoo doortay oo Xildhibaan ka mid ah Gobolka Maroodi-jeex ayaan bilaabayaa falaqaynta Xeerkan, aniga wax gaar ahi nagama dhexeeyaan Madaxweynaha inoo soo gudbiyay Md. Muuse Biixi wax cuqdad ahna kama qabo, laakiin waxaan ahay xildhibaan mucaarad ah oo meesha u fadhiya inuu wax toosiyo marka yaanay u qaadan qolooyinka odhan jiray xildhibaan xoog baa maanta kugu dhilay, wax gaar ah maaha oo aan ula jeedo ee waajibaadkii dastuurigaan gudanayaa.

Xeerkan waxaan ku arkay waxyaabo iska horimanaya oo is diidan ama is jiidhaya, horta marka ugu horeysa xeerka waxay soo raaciyeen Xukuumadu heading-kii Golaha Wakiilada, ma arag Qodobka uu cuskaday inay waafaqsan yihiin dastuurka. Hadii Xildhibaan Xaamud shahaadooyinka uu sheegay sito aniguna waxaan ku takhasusay English language and literature, marka turjumaadu khaladaad badan oo turjumaad khaldan ah baa ku jira xeerka, waana wax la sixi karo, laakiin waxyaabaha iska horimanaya waxa ka mid ah eray-bixinta oo sida u micneynayaan ama waxa loola jeedo khaladaad badani ku jiro sida badeecad, baayac mushtari oo luuqada ingriiska iyo sida somaliga loogu micneeyay kala khaladaad ku jiro.

Anigu xeerkan waxaan soo jeedin lahaa isagoo Af-ingiriisi ah ansixino oo somaliganba ka dayno sababtoo ah qoladii turjuntay way khaldeen, waxay ahayd qolyahaygan luuqada bartay in loo dhiibo oo aanu turjuno lacagba ugama baahnin oo mutadawacnimaan ku turjumaynaaye.

Waxa kale oo jirta sida Xildhibaan Xaamud taabtay inagu expert kuma nihin free zone, waxa loo baahan yahay dad expert ah oo free zone-ka cid ku takhsustay kuma jirto baarlamaanke inaynu u yeedho oo sidii kii dekada aan nala jiidhsiin, marka nimankaniw ay soo turjumeen oo way ka soo shaqeeyeen laakiin dadka inaga wakiil ah inaynu wax ka shaandheyno. Dad badan laa qixinayaa oo meelaha ay degan yihiin laga qaadayaa, marka Xildhibaanada reer Barbera waa inay dadkoodii matalaan oo ka hubiyaan waxan.

Qodobka 6aad ee Xeerkan wuxuu madax banaanaynaa hay'adda aaga ka caagan cashuuraha, isla Qodobka 10aad wuxuu ka qaadayaa hay'addii awooda wuxuuna siinayaa awoodii oo dhan Madaxweynaha, waa iska horimaadada xeerka ku jira, waxa kale oo jira marka shirkadaha waaweyn aad keento aaga ka caagan cashuuraha oo cashuurihii aan laga qaadin oo xeerarkii cashuuraha iyo kastamadu aanay qaban jeeblayaashii yaryaraa ee wax la soo degayay markaad iyaga cashuurihii ka qaado siday bay ula tartamayaan shirkad wayn oo aan cashuur laga qaadin oo xoog wayn, hay'addu ma madax-banaana sida Qodobkan 10aad ku cad, wuxuuna awooda gacanta u galinayaa Madxweynaha halka Qodobkaas 6aad Madax-banaanaynayo Hay'adda oo leh jiritaan qaanuuni ah, marka Qodobkaas 10aad ayaa hadana awoodii ka qaadayo oo waxay isu badalaysaa gudi tala-bixineed oo kaliaya (advisory role) ayuu siinayaa.

Qodobka 8aad Madaxweynihii isagaaba Maayar ah oo dhulkiiba isagaa bixinaya, wuxuu sheegayaa in Madaxweynuhu degreeto ugu qoondeeyo dhul markay hay'addu soo jeediso, marka waxaa maamula dawlaha hoose dhulka oo bixisa hay'adduna waa inay waydiisataa dawlada hoose dhulka Maayarka, sidoo kale halkan Madaxweynuhu wuxuu hadana isu badalayaa joomitir oo waxa ku qoran marka loo baahdo wuxuu madaxweynuhu degreeto ayuu ku soo saarayaa hadii loo baahdo uu wax kaga badalayo ama wax ku darayo cabirka dhulka aaga ama uu ku badalayo magaca aaga ganacsiga, xataa cabirkii buu badalayaa Madaxweynuhu.

Marka awoodii hay'adda oo lagu soo koobay hay'ad talla-bixineed ayaa halka ka muuqata, Xeerku wuu badan yahayo dhowrka qodob baan ka eeg-eegay, laakiin doodda waa la sii wadayaa.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In aynana ku deg-degin Xeerarkan Ansixintooda ee sidaa Xildhibaan Xaamud sheegay rag khubaro ah oo ka soo baaraandega loo dhiibo.

**Md. Faarax Maxamuud Cabdule** **(5min 51sec):-** Saddexdan Xeer ee aad noo dhiibteen waxay kooban yihiin boqol iyo dhowr iyo toban qodob, sabtidii baad noo dhiibteen, waxaan leeyahay oo aan anigu soo jeedinayaa lama bilaabi karo lagamana bogan Xeerarkan ilaa la hello arrimaha badan.

Marka hore habraacii shuruucda, Xeerarku markay Xukuumada ka yimaadaan ee Golaha yimaadaan ee la inoo qaybiyo Gudi baa loo dhibi jiray, Gudiddii looma dhiibin, kamay soo tallo bixin, shalay Gudoomiyaha Gudidda Dhaqaaluhu wuxuu soo jeediyay in la horaysiiyo xeerkan free zone-ka malaha soo jeedintaas uun bay ku lahaayeen, marka waxa weeye inaynu Xeerarkan ka baaraan degno, waa runtood labada Xildhibaan ee iga horeeyay waxay sheegeen inay iska hor imanayaan oo khaladaad badani ku jiro oo ay u baahan yihiin in saddexda xeerba la isla akhriyo, isla markaana Xeerka Dekaduhu ugu horeeyo waayo xeerka dekaduhu isaga dhalaya oo waxan oo dhami ka farcamayaan, waxa kale oo aan soo jeedinayaa in la helo expert khubaro inagala talisa oo aan lagu deg-degin Xeerkan iyadoo Gudiddii lagu celinayo oo iyadu u yeedho khubaradii oo ay talo ka soo bixiyaan, ka dibna Goluhu xil iska saaro oo Xeerka dekadaha oo ugu horeeya Goluhu ka dooddo.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa khubaro sharci oo sharciga caalamiga ah bartay ay ku jiraan khubaradaas, DP World markaynu ansixinaynay sida Xildhibaan Xaamud sheegay Goluhu wuu ku kala qaybsanaa oo dad baa diidanaa, hadana horumar baa laga gaadhay oo arrin fiican, laakiin waxyaabaha maanta ka dhiman ee laga dareemayaa waxa weeye ku deg-degii aynu ku degdegnay iyadoo heshiiskii oo aan dhamayn la inoo keenay, marka waxaan leeyahay yaynaan Xeerarka ku deg-degin, xukuumadu way soo hagaajisay oo iyadu waajibkeedii way ka soo gudatay, anigu iyaga ka hadli maayo, waxaan ka hadlayaa Goleheena, fikirka in la isku ixtiraamo weeye Gudoomiye waxaan anigu dareemayaa Xeerarka inaynu ku deg-degayno oo dabada laga riixayo cid kasta ha ka riixdii oo aan wakhti dhamaystiran lana siinayn, waxaana markhaati ka ah saddexdan Xeer oo sabtidii naloo dhiibay, suurtagalna maaha in saddex cisho lagu dhameeyo. Marka nidaamkeenii aynu Xeerarka isugu gudbin jirnay ee loo raaci jiray aynu ku noqono.

***Waxaan soo jeedinayaa:-***

- Xeerarkan yaan lagu deg-degin, waa muhiim sidaad sheegtay Xeerarkani wadankuna wuu u baahan yahay, laakiin wakhti ku filan, khubaro Golaha talisa oo la helo, sharciga caalamiga ah oo la waafajiyo waxaas oo dhan bay u baahan yihiin, marka Gudoomiye yaan Xeerarka lagu deg-degin.

**Md. Axmed Ducaale Bulaale** **(10min 05sec):-** Bismilaahi, horta Gudoomiye saddexdan Xeer, horta mid waan qabaa oo Xeerarku waa inay inaga baxaan, laakiin inagoo ka baaraan degnay oo aanay waxba inoogu hadhsanayn inay inaga baxaan, waxa kale oo

loo baahan yahay markaynu Golaha Wakiilada inagu nahay waa inaynu policy-ga ku saxna Xeerka waana waajibaadkeena kowaad inaynu saxno, waxa jirta in mashaariic badan aqoonteeda inay inagu yar yihiin ama aynaan lahayn aqoontooda.

Gudoomiye Xeerarka saddexda anigu sidaan u akhriyay in dhowaydba xeer uma akhrin, waan akhriyo waan dhameeyay saddexdaba, qaarbaaba ku noqday saddex saddex jeer, waan fahmi waayay, waana in aad xeerka nuxurkiisa aad fahamtaa, markii dambe waxaan isku qanciyay inaan anigu xeerarkan badaw ka ahay oo aan gaadhin aqoontooda, hadii uu yahay Xeer saxaafadeed ama xeer waxbarasho oo aan labada ku soo shaqeeyay waxbaan ka bixin lahaa, marka kuwan waan fahmi waayay oo aqoon uma lihi, waxaana iiga soo baxay dhowr arrimood.

- Marka hore tartiibka Xeerku u sameysan yahay maaha mid sax ah, waa mid isku yaacsan oo habeysanayn, sida qodobadu u kala horeeyaan, waxaa ugu horeeya ujeedadda Xeerka, waxaana ka dambeeya erey bixintii oo ay ahayn inay ka horeeyaan iyo magacii xeerka, turjumida ingriiska waxba iyana ka khalkhadan.
- Waxa kale oo khaladaad ku jira, inagu markaynu wax qorayno luuqada sharciga ee rasmiga ee aynu xeerka u eeganayo waa luuqada Af-somaliga, markay sidaa tahay halkan waxaad mooda sidii waraaqihii workshops halkan labadii luuqadood baa isku barbar qoran marka turjumada la eego iska horimanaya, waa in qodobka aad doonayso ee ingriisiga ku qoran in aad nuxurka qaadato, marka waa in Afsomali la qaato iyadoon nuxurkii ingriisiga la luminayan.
- Waxa kale oo dhaliilaha iiga muuqda ka mida h, wax kasta ama mashruuc kasta oo aynu ansixinayo luuqad buu leeyahay, marka aynu doonayno xeer xanaanada xoolaha inaynu ansixino luuqad bay leedahay, sharcigu luuqad u gooniya oo luuqad sharci ah buu leeyahay, maaha afsomaliga aynu suuqa ka akhriyaynu oo sheeko ahayn.

Marka waxyaabahaas oo dhan baa iiga muuqday oo nuxurkii wuu is dhaafsan yahay, ereyaduna inta badan way is dhaafsan yihiin. Marka Gudoomiye inagoon xeerarkan meel dhigayn ama desk pen ku ridayn oo ay tahay in xeerarka oo dhami ina dhaafaan, waa inaynu u fadhinaa hadaynu doono kal-fadhi aan caadi ahayn u fadhinaa, laakiin waa inaynu ka dharegno.

***Waxaan ku soo gabo-gabeynayaa:-***

- Waa inaynu qaadano laba ama saddex nin oo khubaro ah oo laba maalmod ama saddex maalmood aynu nidhaahno inoo soo sharaxa oo meel kasta waxa loola jeedo inoo sheega.
- Markay inta inoo sharaxaan aynu Gudi gaar ah (ad hoc committee) u saarno oo luuqadii sharci inoo soo waafajiyaan iyaguna ka mid noqdaan ayaan soo jeedinayaa.

**Md. Siciid Maxamed Cilmi** **(11min 28sec):-** Bismilaahi, Shir-gudoonka, Xildhibaanada, Shaqaalaha, Saxaafada iyo Martida kale waan idin salaamayaa ASC, anigu doodayda saddex madax baan u kala qaybinayaa.

Marka ugu horeysa, Xukuumada Madaxweynaha waxaan uga mahadcelinayaa xilka ay iska saareen arrimahan dhaqaalaha, saddexdan xeer ee ina horyaal Gudoomiye iyo Mudanyaal waa xeerar muhiim u ah soo noolaynta dhaqaalaha dalka, saddexdan xeer inay mar hore inoo yimaadaan bay ahayd oo waxaan ku raacsanahay xildhibaan xaamud oo si fiican u dhigay, mar hadii ay maantaba inoo yimi waxaan rajaynayaa in aynaan camb-cambusin oo marba wax ka dhex ursane inaynu de-dejino oo uu inaga baxo Xeer fiican oo dhamaystiran deg-degna inooga bixi lahaayeen.

Waxaan ku raacsanahay Xildhibaanadii hadlay oo dhan Qodobka ah inaynu u baahanahay si fiican oo ka baaraan degid ah inaynu xeerarka u eegno, anigu mid baan kaga duwanahayo waxaan jecelahay inaynu timeline u sameyno sida uu sheegay Xildhibaan Axmed Ducaale, Xeerarkan qofka is yidhaahda akhri midkiiba maalin galinkeed buu ku akhriyi karaa, maaha wax waaeyn, waxayse u baahan yihiin mid waliba meelo gaar ah Xildhibaanada qaarna meelo ka taa-taabteen anigu qaarkood markan akhriyay arkay in dib loo habeeyo afkana luuqadaha turjumaadooda la hagaajiyo, logical sequences-ka ay xeerarku leeyihiin dib loo habeeyo, wax weyna maahe waa waxaynu doodeena ku dhameyn karno, marka doodu dhamaatona xoghaynta iyo dhowr xildhibaan oo lagu daraa ay la eegi karaan, xataa xildhibaano kale maahe Gudiddii dhaqaalaha iyo xoghayntu dib u soo habeeyaan.

Waxaana soo jeedinayaa saddexda Xeerba inaynaan u kala tagin, mid walbana aynu siino 3 saddex wiig, marka waxay noqonaysaa wiigan iyo laba wiig oo kale inaynu kan ku dhameyno, waajibaad baana inaga saaran qaranka kal-fadhi aan caadi ahayn oo gaar ah baynu qabsan karnaa wax inoo diidayaana ma jirto oo shaqo qaran, hawshaasina waa hawl muhiima.

Waxaan ku soo noqonayaa dhowr qodob inaan saxo, mid cashuuraha, mid waa dhulka bixintiisa, midna waa luuqada, midina waa tittle-ka boga sare, wali anigu ma arag bogaa sare oo wasaaradi ku qoran tahay oo la inoo qaybiyay, markay halkan soo galayso Golaha Wakiilada ayaa sidan ugu qornaa, tan ku saabsan cashuuraha oo Qodobada qaar tilmaamayaan in marka dambe Madaxweynaha loo gaynayo, waxaan Xildhibaanada xasuusinayaa laba Xeer baynu halka ka ansixinay mid waa Xeerka maamulka maaliyada Xeer Lr. 75/2016 iyo Xeerka kastama oo 73/2016 waa Xeerarkii PFMka, xeerarkaasi waxay si cad u muujinayaan inaan cid aan xukuumada ahayni marka laga yimaado Wasaarada in aanay cashuuraha xeer u sameyn karin, dastuurkuna wuxuu muujinayaa xukuumada oo kaliya inay u soo gudbin karto Golaha Wakiilada ansixinta cashuuraha, marka yaynaan dhibsanin in madaxweynaha lagu celinayo warbixinta cashuuraha, cashuuraha hay'adi ma go'aamin karto sida hay'adda halkan lagu dhigay.

Arrinta bixinta dhulka, Xeerka Dhulka Xeer Lr.17 wuxuu sheegayaa wax allaale wixii danguud ah sida free zone-ka oo danguud ah uu Madaxweynuhu bixin karo marka Wasaarada Hawlaha Guud u soo jeediso, laakiin ma bixin karaan wixii danguud ah Maayaradu.

Arrinta luuqada, Xeerkaynu saxaynaaye arrinta luuqada waxa muuhim maadaama xeerkani yahay xeer aanay istcimaalayn shirkadaha wadaniga ah oo kaliya ee ay badanaan doonaan isticmaalkiisa shirkado ajaanib ah oo aynu u gaadeyno inay inoogu soo galaan international investors-ku, marka waa inuu yeesho qaybtiisa Ingriisiga, dastuurkuna wuu baneeyay in hadii loo arko muhiim la isticmaali karo luuqadaha Af-carabiga iyo Af-ingiriisiga, marka waxaan soo jeedinayaa in qaybta Ingiriisiga loo daayo Xeerka anigoo baahida ah in international investors-ku isticmaalaan u eegaya.

***Gabo-gabadii:-***

- Waxaan la qabaa Xildhibaanada inaynu u baahanahay inaynu si gaar ah u eegno Xeerka, waxa kale oo aan soo jeediyay in saddexda xeer aan loo kala tagin inta laga ansixinayo, waxaan soo jeediyay marka aynu dooddno in Gudidda Dhaqaalaha iyo Xoghayntu sequences-ka iyo meelaha eray-bixintu isdhaafsan tahay iyagoo raacaya soo jeedinta xildhibaanada hagaajiyaan, muddo saddex wiig ahna aynu siino, waad-mahadsan tihiin.

**Md. Axmed Barkhad Obsiiye:-**

**Md. Cabdiraxmaan Yuusuf Cartan** (10min 41sec):- Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha sharafta leh waan idin Salaamayaa Wsc Wr Wb. Shiki kuma jiro in xeerarkani ay yihiin xeerar aad iyo aad u muhiim ah oo dalku u baahanyahay, waxaanan filyaa Gudoomiye, in aynu ilduufnay markii aynu dooranay Xeerka Xeerka Ganacsiga Aagga Cashuuraha ka caaggan (free Zone-ka) waayo xeerkani maaha kii hooyada ahaa. Xeerka hooyada ahi waxa uu ahaa xeerka Dekadaha, ma aan akhriyay xeerka waxaan ku arkay qodoba badan oo u baahan fasiraad, qodobadii fasiri lahaana ay ku yaalaan xeerkaa dekadaha, markaa si aad xeerkaa u fahanto waxaad u baahantahay inaad xeerkaa dekadaha aan la akhrido.

Marka aan xeerka u soo noqdo dadkii kasoo shaqeeyay ee Af-soomaaliga iyo af-Ingiriisaga runbaa fiicane way da'daaleen laakiin dhanka concept-iga qaana waa dhaqaale qaarna waa sharci, tusaale ayaan idin siinayaa oo xeerka waxaa ku qoran Corporate body, waxaa ku qoran Enterprise, waxaa ku qoran Companies kuwaad oo dhamaantood ah wax ka qayb galaya free Zone-ka erayadaa aan soo sheegay dhamaantood wax ay afsoomaali ku noqonayaa la garan maayo, sidoo kale waxaa ku qoran Developer iyo In vaster wax isku micno ahna maaha waa kala jaad.

***Maarkaa ra'yiga ay xildhibaanadu soo jeedinyeen ee ahaa Aqoon yahay Economic Expert iyo Legal Expert waa in uu hawsha inagala taliyo hadii kale indhaha ayay nu ka ridaynaa .***

Sidoo kale tusaale ahaan waxaa la turjumay erayga aha **Special Economic Zone** waxaana laga dhigay **"Aagga Ganacsiga Cashuuraha Kacaagan'** waana qalad waayo waxay noqonaysaa **"Aaga dhaqaale ee Gaarka ah "**markaa ciladu maa afsoomaliga ee waxaa weeyi Concepts-ka, markaa waxaan u baahanahay dadkaa aan soo sheegay ee dhaqaalaha iyo sharciyadaba aqoonta u leh.

Sidoo kale waxaa xeerka ku qoran Established oo mar uu istimaalayo dhisid marna uu isticmaalayo aasaasid marna waxa uu isticmaalayaa Abuurid markaa xeer waxaas oo erayo ah lagu isticmaalayo xeer noqon maayo oo qolyaha xeerkan soo turjumay arimahaa may dhawrin in eray qudha xeerka bilaw ilaa dhamaan loo adeegsado kalmada Established.

Markaa waxaan leeyahay waa in aynu khubaradaa u yeedhano waayo Xeerka shaqayanyaa waa xeerka Af-Soomaaliga ah, waana in cidii u baahata loo turjumaa. Sidoo kale mudane Gudoomiye waa halkii aan ku lahaa waynu ilduufnee halkan waxaa ku qoran Board of directors halkan si fiican uguma faah-faahsana ee waxa uu ku jiraa xeerka Dekadaha isga oo aad u faah-faahsan.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In xeerkan mudada yar ee inoo hadhay hadii aynu isnidhaa ka gaadhsiiya meel ka dhac ayay inagu noqonaysaa ee waxaynu u baahanahay in aynu si miyir qabta uga gungaadhno oo aynu raadsano aqoontaa inaga maqan, sidoo kale xeerkuna isga oo Af-soomaaligiisu sax sanyahay uu inaga boxo ayaan aaminsanahay WCS.

**Md. Naasir X. Cali Shire (**7min 32sec):- shirgudoonka, saaxiibadayda aanu xildhibaanada isku nahay iyo cid kasta oo hada Hoolkan aynu joognaba ju sugan ASC. Waxaan jeclaa in aan dooda xaga hore ka galo lakiin waxba malahan oo waxaa la yidhi "*marka dhariga xaabadu ay ka basto waxaa la yidhaa dhariga xaabada ha la israaciyo* "markaa wixii halkan laga dooday ayaan xaabada hore ugu riixayaa.

Ugu horay waxaan ugu soo talo galay in aan aad uga dodo xeerka, laakiinse sida hada muuqata waxaad moodaa in ay doodu u dhacayso ma labilaabaa mise lama bilaabo, markaa anigu waxaan saxayaa Saddex qodob waa ta 1aad madaxweynaha ayaa waxa uu soo raaciyay warqad in uu yahay priority ama xeerarka aad ka u muhiimka ah una baahan in la Ansixiyo, iyada oo aynu maanta kawada dharagsanahay in maanta Gobolka ama Somaaliland ay mashaariic waaweyni ay ka socdaa oo la doonayo in aynu noqono xudub dhaqaale oo geeska Africa ah oo ay mashaariicdaasina ay gabo-gabo ku dhawyihiin xeerarkii lagu dhaqi lahaana ay yihiin kuwan ina horyaala.

Markaa waxaan qabaa maadaamo oo uu madaxweynuhu inaga codsatay in aynu ansixino, waxaan leeyahay ayaynaan u fakirin sidii hore ee ahayd in uu mudo ina horyaalo xeerku, ee waxaa muhim ah in aynu ku dhakhsano.

Ta labaad ee aan saxayaa waxay tahay, marka laga hadlaayo free Zone-ka iyo qaabka loo maamulaayo iyo Dekadaba waa hay'ad madaxbanaan oo hoos timaada Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland, waxaanad ogaataan in cida magacaabaysa board-ka uu yahay madaxweynaha taana waan saxayaa.

Waxaa kale oo aan saxayaa dhanka turjumaada, waligay maan arag turjumaad wax la turjumayo oo kalmad kalmad la iskugu turjumaayo, waayo anigu waxaan ka soo shaqeeyay in aan isku turjumo afka soomaaliga iyo Afka iswidhishka, markaa waa in aad fahantaa nuxurka macnaha loo jeedo dabadeedna afkaa aad ku sheegtaa, laakiin shardi maaha in eraygani in sidii uu ahaa aad u sheegto ee waxaa la qaadanayaa macnaha guud ee uu leeyahay eraygaasi.

Waxaa kale oo aan halkan ka cadaynaa dad badan ayaa waxay ku cel-celiyeen in aanu Golaha ku jirin cid soo baratay, waxaan halkan ka sheegayaa in aan sito laba MASTER oo kala ah Logistic and Supply chain Management oo aan ka qaatay wadanka Sweden, markaa marka laga hadlaayo Free Zone waa Cilmi aan bartay waxaanan ku faraxsanahay in cilmigii aan soo bartay maanta halkan laga hadlayo, sidoo kale waxaan qirayaa in dadkii soo diyaariyay xeerkani ay ahaayeen dad cilmi u leh, yaqaanana sida loo maamulo Free Zone-ka sidan uu hada u qoranyahayna waa sidii loo qori jiray xeerarka Free Zone-ka.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In xeerkan dariiqa u dhaw aynu u gudo galno ayaynu samayno sidii xildhibaankii iga horeeyay uu sheegay ama sidii uu xildhibaan siciid sheegay in aanay inagaga badan laba weeg oo aynu ansixino waana in xeerka wixii ka qaldan aynu dood ku saxnaa.

**Md. Ibraahin Axmed Regal** (14min 41sec):- mudane Gudoomiye, shaqaalaha sharafta leh waan soo gaabinayaa oo 30 ama 40 daqiiqo ka badin maayo, sidii ay gudidda dhaqaaluhu soo jeedisay ee ahayd in xeerka Free Zone-ka loogu horaysiiyo oo aynu isla qaadanay shalay.

Sidaa awgeed waxaan hadalkaygan u qaybinayaa laba qaybood. Qaybta 1aad waa arimaha ku saabsan arrimaha xaga qoraalka ku saabsan oo tusaale ahaan halka ay ku qorantahay A, B, C, waa in laga dhigaa B, T,J.

Waxaa kale oo aan sheegayaa in uu yahay Af-soomaaligu Rasmi, anigu mudane Gudoomiye waxaan ku soo shaqeeyay turjumaan. Markaa xeerkan waxaa lagu turjumay Direct translation sidaasi macnaha ayaa ku lumaya.

Xeerarkan la inoo qaybiyay waxaa la inoogu qaybiyay iyada oo caalamada ku taalaa ay tahay tii Golaha wakiilada ayna ku qorantahay Goluhu waxa uu ansixiyay soon adiyaariyay hadana waxaa saaran shaanbadii madaxtooyada.

Hadii aan wax ka idhaa magaca Xeerka Aaga ka caagan waxaan soo jeedinayaa in lagu Beddelo kalmad caan ah "*Suuqa Xorta ah ama Aaaga ganacsiga xorta ah*". Ujeedaha xeerka marka aan u gudbo waxaan ku soo kordhinayaa oo aan ku soo darayaa kobcinta dhaqaalaha dalka ee gobolkan aynu ku noolnahay ee badweynaha Hindiya iyo gacanka cad meed eraygaasi waa khalad oo marka baabal mandal loo dhaafo galbeed ayay bada cadi ka bilaabantaa.

Waxaan soo jeedinayaa 51% ay Somaliland yeelato board authority-ga la samaynayo inta kale oo ah %41 ay yeeshaan maal-fgaliyayaashu waayo waxa awooda ku siinaya. Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in Aaagaa canacsiga ee cashuuraha ka caagan la kordhiyo amaankiisa oo aynu dal ahaan aan u xoojino. Waa in aan ganacsatadeena dhiiri galinaa si ay qabsadaan aagaa.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Iin xeerkan aynu maalin iyo lababa siino waana in aynu siidaynaa xeerka

**Md. Maxamed Faarax Qabile** (5min 33sec):- Mudane Gudoomiye anagu hadii aanu nahay macalimiinta sida ragi iga horeeyay ee cartan iyo ragii kale aqoontayada been kama sheegno, waxaana la yidhi dadku waa u nacab wixii aanay garanayn, markaa nuxurka iyo erayada halkani qoranay waa kalmado ay isticmaalaan waxaaxo gaar ahi, sidaa awgeed waxaan leeyahay xeerkani maaha mid ay Somaliland curisay maaha ayaan leeyahay, dabeecadiisa ayay ka muuqataa waana xeer la soo raray oo cid ajaanid ahi ay danaheeda ku salaysay mana aha mid waaqaca Somaliland ka hadlaya waxaana tusaale u ah sadexda xeerka maareeyayaasha loo magacaabay waxay leeyihiin awoodo dheeraad ah sida xeerarka ka muuqata oo tusaale aynu u soo qaadan karno in ay ku qaran tahay in iyo wixii kale ee ay xal u arkaan, waxayna ka soo horjeedaa qodobka 53aad ee Dastuurka.

Waxaan qirayaa waxan xeerarkan ina horyaaa ku qora in aanay golahi waxba ka garanayn, sidaa awgeed hadii aan gaar ahaan anigu iska hadlo nuxurkooda xeerarkan wax aan ka fah-may ma jirto ;

**Gudoomiye Axmed-yasin;** Xildhibaan Golaha iyo qarankan meel ha kaga dhicin ee xeerka ku noqo.

**Qabile;** ***Anigu waxaan soo jeedinayaa:-***

- ***In loo saaro khubaro waxan aqoon u leh hadii kale Golahani umada waxa uu galinayaa curyaan, waxaana qabaa in aynaan xeerarkaa gali karin khubaradaa la'aan teed.***

**Md. Saleebaan Diiriye Barre** (10min 24sec):- ugu horayn waan salaamayaa shirgudoonka Golaha, Saxaafada asc, ugu horayn waxaan la qabaa mudanayaashii iga horeeyay ee soo jeediyay in xeerkani uu u baahanyahay khubaro expert ah una baahan in wakhti ku filan la siiyo, waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in xeerku aanu xeer kale ku

tiirsanaan xaqiiqatan ee uu xeerku isagu is fasirayo oo uu is dhamaystirayo wixii kale ee looga baahdana Dastuurka loogu noqonayo, markaa waxaan qabaa in Xeer, Xeer loogu noqodo waa khalad nidaam ahaan.

Hadii aan u gudo galo xeerkan oo mudada aynu haysanay ay tahay mudo 3cisho ah intaaba waan akhriyayay walina maan dhamayn, waxaan u jeedaa marka aad qodobka nuxurkiisa aad fahanto ee aanad iska akhriyin ayuu u baahanyahay. Xeer kani waa in uu ahaadaa xeer dhaxal galaya oo mustaqbal samaynaya ee maaha in aynu maanta oo kaliya eegno.

Sida aan xeerkan ku arkay dhamaan shaqooyinka waxa uu siinayaa shirkadaha wadniga ah ee kumaan arag shirkado aan wadani ahayn ama dibadeed, hadii ay ku jiraan oo aanan arag waa meel meel kooban ayaa laga yaabaa, xeerkan waxa ugu badan ee uu ka hadlayaa waa cida la magacaabayo hadii ay noqon lahayd Gudiyada, maareeyayaasha iyo qaababka ay cashuuraha u filnayaan oo ay qodobada qaar waajibinayaan in cashuuraha la soo gurayo ay iyagu maamulayaan taasinay ay tahay wax qalad ah ee ay ahay inay wasaarada maaliyadu wixii tacriifad iyo cashuur ah ay soo sameeyaan.

Waxaa kale oo xeerkan ka maqan free zone-kan cidii maamuli lahayd, sida la ii sheegay waxay ku jirtaa xeerka Dekadaha, waxayna ahayd in ay kan ku qornaato sida loo magacaabayo, sida ay xilka ku waayi karaan iyo awoodaha ay leeyihiin waxay ahayn in xeerkan ku cadaato, hadii la leeyahay waa xeerar isku xidhan waa in hal xeer laga dhigaa.

Waxaan aad iyo aad ugu soo horjeedaa luuqada uu ku qoran yahay xeerkan qayb ka mid ahi oo ah luuqada ingiriisiga oo aan leeyahay waxa uu ka soo horjeedaa Dastuurka maadaama oo luuqada dadlka laga hadlaa ay tahay Luuqada Af-soomaaliga iyada oo uu dastuurku si cad u sheegay in xataa luuqada labaad ay tahay luuqada Af-ka Carabiga ee ayna ahayn luuqada Af-ka Ingiriisiga. waxaan madaxweynaha qarankana u soo jeedinayaa in uu arintaa hoos u eego.

**Qodobka 10aad: Dhismaha Hay'adda Aagagga Cashuuraha Kacaagan farqadiisa 3aad** Hay'addu waxay yeelanaysaa jiritaan qaanuuni ah iyo Shaambad u gaar ah, waxayna yeelan kartaa hanti guurto iyo mid maguurto ah isla markaana ku gali kartaa magaceeda heshiis kasta, kuna dacwayn karaa ama lagu dacwayn karaa, ama ku fulin kartaa hawl kasta oo lagama maarmaan u ah fulinta hawlaheeda ku xusan Xeerkan iyo xeerarka khuseeya ee dalka. Waxaan u arkaa in ayna meesha qaban farqadaasi ee laga saaro xeerka ama la cadeeyo. Sidoo kale meelaha isla qodobka ee ay ku qoranyihii Xarfaha A,B,C iyo Af-saamaali laga Dhigo oo B. T . Iyo J lagu beddelo.

Sidoo kale farqada I oo u dhigan sidan In ay ka hirgeliso adeega kastamka Aaggaga Ganacsiga Cashuuraha Kacaagan, isla markaana u ogolaato in xafiisyada kastamka laga furo Aaggaga Ganacsiga Cashuuraha Kacaagan sidoo kalana siiso qalabka iyo tas-

hiilaadka ay u baahan yihiin. Waxaan u arkaa in awoodii wasaarada maaliyada cid kale faraha loo galiyay taasina laga daayo oo aynu u eegno mustaqbal ahaan.

Sidoo kale waxaan soo jeedinayaa shirkadaha ka shaqaysanaya aagaga uu xeerkani sheegayo in la cadeeyo ajuurada laga qaadayo waayo xeerkan kuma cada, sidoo kale waxaan qabaa in wixii nidaam ah hadii ay noqon lahayd nidaamka wax loo cashuurayo iyo nidaam ka wax loo dajinayaba ay iyadana xeerka ku cadaadaan. Dhanka kale waa in la cadeeyaa free Zone-ku halka uu noqonayo ee laga dhigayo.

Waxaan la qabaa xildhibaano badan in xeerkan juhdi farabadan la galiyay, waxaan soo jeedinayaa in gabi ahaanba meesha laga saaro luuqada Af-ka ingriisiga ee uu ku qoran yahay loona daayo Af- Somaaliga oo kaliya, waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in khubaro loo saaro xeerka, waanan u mahad celinayaa madaxweynaha Qaranka ee xeerkan soo diyaariyay iyo cid walba oo ka soo shaqaysay xeerkan jecelna horumarka qarankan. Waxaa kale oo aan jeclahay in aynu Berbera horumarino, sidoo wixii xeerarka muhmal inaga galinaya waa in aynu ka saarnaa oo aynu hagaajinaa.

**Ugu danbayntii waxaan soo jeedinayaa**

- In xeerkan lagu soo daro heshiisyada ay galayaan board of directors ka loo magacaabayo Aaaga cashuuraha ka caagan iyo Dekadaba oo la keeno Golaha wakiilada si aynu u ansixino. Waayo wali anigu ma arag heshiiskii dekada ee Dpworl. Waana in la keenaa si loo ansixiyo, waana in xeerka wakhiti ku filan la siiyaa.